Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)

# Ka Xayuubinta Mas'uuliyadda

**Release of Liability**

Heshiiskan ayaa Maamulka Naafonimada Koriinka ka xayuubinaya dhammaan mas'uuliyadaha la xiriira dhaawacyada ama waxyeellada guriga ka-dib rakibaadda qalabka uu bixiyay Maamulka balse aannu rakibin adeeg-bixiyaha qandaraaska kula jira Maamulka. Ka xayuubiyaha ayaa codsanaya in la bixiyo rakibaad halista ka dhalata ay iyaggu qaadayaan oo aan loo mareyn hannaanka Maamulka ee La-qabsashada Deegaanka si loogu rakibo qalabka la bixiyay.

Marka aan saxiixo heshiiskan, anigga oo ah, ____________________, waxaan oggolahay Maamulka Naafonimada Koriinka in aan gebin ahaan u qabsan doonin wax mas'uuliyad ah, oo ay ku jiraan mas'uuliyadaha maaliyadeed ee iibka iyo rakibaadda qalab kasta ee gurigeyga lagu rakibo. Waxaan qirayaa halisaha ay leedahay rakibaadda qalabka ee uu bixiyay Maamulka. Waxaan tallaabadan u codsanayaa si khiyaari ah, waxaanna si cad la iigu sheegay halisaha oo dhan. Waxaan qirayaa in Maamulka Naafonimada Koriinka uusan dammaanad qaadayn bedqabka qalab kasta ee lacagtiisa lagu bixiyay codsigeyga, ama ma dammaanad qaadayo rakibaadda ammaanka ah ee qalabkaasi ee gurigeyga.

Marka aan hoos saxiixo ayaa waxaan luminayaa dhammaan xuquuqaha aan ku soo gudbin lahaa dacwadda ka dhanka ah Maamulka Naafonimada Koriinka ee ku saabsan iibinta iyo/ama rakibaadda qalab kasta waxaanna sameyn doonaa dadaal kasta ee lagu hubinayo rakibaadda qalabka saxda ah ee ammaanka ah. Waxaan oggolahay in maamulku uusan ma'uul ka noqon bixinta dayactirka ama beddelaadda qalab kasta ee waxyeello soo gaarta inta lagu guda jirro hannaanka rakibaadda.

Anigga oo ah, ____________________, waxaan si buuxda u fahamsanahay shuruudaha kor ku xusan.

| SAXIIXA TAARIIKHDA | MAGACA QORAN |
|---|---|
| | |

## Tilmaamaha

**Ujeeddada:** Ujeeddada foomkan laga leeyahay waa in Maamulka Naafonimada Koriinka laga xayuubiyo dhammaan mas'uuliyadaha la xiriira dhaawacyada ama waxyeellada guriga soo gaara ka-dib rakibaadda qalabka uu bixiyay maamulka marka macmiilka DDA ama wakiilka sharciga ah uu codsado rakibaadda agabka aannu rakibin adeeg bixiyaha qandaraaska kula jira Maamulka.

**Goorma ayaa foomkan la adeegsadaa?** Foomkan ayaa loo baahan yahay marka macmiilka ama wakiilka sharciga ah ay doortaan in hay'ad kale ay u rakibto qalabka ee uu lacagtiisu bixiyay DDA balse aysan rakabin adeeg-bixiye qandaraas kula jira DDA.

**Kumaa saxiixi kara foomkan?** Macmiilka DDA ama mas'uulkooda sharciga ah. Haddii uu yahay guri kiro ah, milkiilaha guriga waa in uu saxiixaa ka xayuubinta.

**Halkee loo baahan yahay in foomka la geliyo?** Qaybta sharciga ee faylka Macmiilka.